

Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan kaalmo dhaqaale (cayr)

Jawaabo kooban ee su'aalaha ugu caansan

Haddaad dooneyso inaad hesho warbixin intaa ka faahfaahsan, la xiriir adeegga bulshada ee degmadaada ama fiiri qeybta hoos ku qoran ee Su'aalo dheeraad ah.

Xaggeen kala xiriiraa?

Adeegga bulshada ee degmada aad deggan tahay. Haddaad si kumeelgaar ah u joogto degmo kale oo aad caawimo degdeg ah u baahan tahay, waxaad la xiriiri kartaa degmada aad joogto.

Sideen u codsadaa kaalmo?

Wac oo sameeyso ballan booqasho. Markaad ballantaada u timaadid waxaad dhiibeysaa foomka codsiga iyo warbixinnada ku saabsan marxaladdaada dhaqaale ee gacanhayahaagu u baahan yahay.

Adeegga bulshada miyuu keydiyaa warbixinnada?

Haa. Caadiyan waxaa warbixinnada la keydiyaa shan sano, ka dibna waa la burburiyaa.

Habkee baa codsiga loo falanqeeyaa?

Shakhsi waliba codsigiisa macaawimada gooni baa loogu qiimeeyaa. Gacanhayuhu wuxuu fiirinayaa marxaladdaada dhaqaale, misna sidoo kale waxaad adiga nafsaddaada ama adeegga bulshada aad qaban kartaan si aad u noqoto qof is masruufa.

Maxaan sameeyaa haddaan helin mucaawimo?

Waxaad khasban kartaa go'aan qoran oo aad ka dacwoon kartid. Weydiiso gacanhayahaaga warbixin ku saabsan habka taas loo maro.

Ma ku khasbanaan karaa inaan dib lacag u celiyo?

Haa. Masalan haddii kaalmadu ay tahay nooc ka mid ah hormarin ama haddaad si qaldan ku heshay kaalmo farobadan.

Kaalmo maxaan u heli karaa?

Waxaad heli kartaa kaalmo masruuf iyo waxyaalo kale oo aad u baahan tahay si aad heer nololeed macquul ah ugu noolaatid.

Su'aalo dheeraad ah

Yaan la xiriiraa si aan warbixin u helo?

Haddaad su'aalahaaga jawaabo u dooneysid marka hore la xiriirtaa *adeegga bulshada* ee degmada aad deggan tahay. Adeegga bulshada ayaa ka shaqeeya kaalmo dhaqaale isagoo cuskanaya [sharciga adeegga bulshada](#).

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa *maamulka gobolka* oo ah maamul kormeere, taasoo micnaheedu tahay inuu dusha ka ilaaliyo sida xaafiisyada adeegga bulshada ee gobolka degmooyinkiisa ay hawshooda u guttaan. Waxaad sidoo kale maamulka gobolka la xiriiri kartaa haddaad fikrado ka qabto adeegga bulshada shaqadiisa ama soo dhaweyntiisa. Laakiin marka hore isku day inaad dacwadaada si toos ah ugu soo bandhigid adeegga bulshada.

Maamulka Bulshada ma faaqido, mana ka bixiyo talooyin arrimo kaalmo dhaqaale oo shakhsiga gaar u ah. Waxeynu nahay maamul dhexe oo dowladeed oo ka shaqeeya su'aalo guud sida raadraac, horumarin, aqoontebin iyo iskudubbarid. Warbixin guud ee kaalmo dhaqaale waxaad ka heleysaa *talobixinteenaa guud* (SOSFS 2003:5) ee kaalmo dhaqaale iyo *buugga tusaalebixinta* kaalmo dhaqaale.

Habkee loo raadsadaa kaalmo dhaqaale?

Yaan la xiriiraa?

La xiriir adeegga bulshada degmadaada oo qabso ballan booqasho. Inta badan adeegga bulshada taleefanka ayuuba doonayaa inuu wax yar ka ogaado sababta aad u soo wacday. Waa inaad u sheegtaa magac iyo cinwaan. Inta badan adeegga bulshada wuxuu soo diraa warbixinno qoraal ah, halkaasoo ay masalan ku magacaaban yihiin waxa aad u soo qaadanaysid booqashadaada. Inta badan waxaad sidoo kale heleysaa foom codsi oo lagaa doonayo inaad buuxiso oo kulanka u soo qaadato.

Xusuusnow inaad sheegatid haddaad turjumaan u baahan tahay.

Warbixinnadee baa la iga rabaa?

Baaritaan kaalmo dhaqaale waa loo madaxbannaan yahay, lama qaban karo haddaadan oggoleyn. Marka aad dooneysid baad adeegga bulshada weydiisan kartaa inuu joojiyo baaritaanka. Laakiin haddaad rabtid inaad hesho go'aan ku dhisan baaritaan saxan khasab bay kugu tahay inaad adeegga bulshada u gudbiso warbixinnada lagaa doonayo. Warbixinnadaasai waxay masalan noqon karaan kuwo ku saabsan hooy, marxalado qoys iyo marxaladaha dhaqaale oo muhiim u ah qiimeynta codsigaaga oo *dhan*, masalan dakhli, hanti iyo qarash.

Maxaa ku dhacaya warbixinnada aan u dhiibay adeegga bulshada?

Adeegga bulshada waa ku waajib inay qoraan oo daliil u yeelaan warbixinnada muhiimka u ah falanqeynta codsigaaga. Waa inay masalan warqadaha ka muuqdaan waxa soo banbaxay marka gacanhayuhu uu warbixinno ka baaray maamullo kale iyo go'aannada la gaaray. Waa inaad ansaxdaa in gacanhayuhu uu la xiriiro maamullo kale, kaasoo inta badan aad raacineysid foomka codsiga.

Warqaduhu waa inay noqdaan kuwo habboon oo dhexdhexaad ah oo aysan ku oolayn warbixinno qofka sharaftiisa hoos u dhigaya. Adeegga bulshada waxay uun daliil u yeelayaan waxa micnaha u leh baaritaankooda iyo go'aankooda. Xaq baad u leedahay inaad akhrisato waxa lagaa qoray, waxa kale oo aad xaq u leedahay in la xuso haddaad waxa qoran aad u aragto inay qaldan yihiin ama aad aragti duwan aad ka qabto. Warqadaha waxa caadiyan la keydiyaa shan sannadood, ka dibna waa la burburiyaa.

Warbixinnada aad u dhiibeyso adeegga bulshada waa ku sir, taasoo micniheedu uu yahay cidina inaan loo dhiibi karin. Mararka qaarkoodse taas way reebban tahay, masalan markuu boolisku isagoo dembibaaris ku jira soo weydiisto warbixinnadaas.

Maxaa dhacaya haddaan dhiibay warbixinno qaldan?

Waxa khasab kugu noqoneysa inaad soo celiso macaawimada aad ku heshay warbixinnada qaladka ah. Haddii aad si ulakac ah u qiyaantay adeegga bulshada oo uu dembigaas kugu tuhmo, waxay keeni kartaa in boolis dacwad loo gudbiyo.

Maxaan u soo qaataa booqashada adeegga bulshada?

Waa inaad wadataa warqad aqoonsi muujineysa qofka aad tahay iyo heshiis ijaar guri/ogeysiin ijaar ama wax kale oo muujinaya meesha aad deggan tahay iyo inta aad ka bixiso hooyga. Si aad u muujisid marxaladdaada dhaqaale waxaad soo qaadi kartaa koobiga lifaaqa qeexidda canshuurtaada. Haddaad dakhli ku soo gala leedahay waa inaad wadataa wargelin mushaar iyo ogeysiin bixin ee masalan ku saabsan hawlgab, gunno bukaan-socod, gunno waalid, taageero masruuf ilmo ama kaalmo ijaar hooy ee 2-3 dii bilood ee ugu danbeeyey. Waxaad sidoo kale soo qaadan kartaa wax kale oo aad u aragtid inay gacanhayaha u fududeynayaan fahamka marxaladdaada dhaqaale.

Markaad u codsaneysid kaalmo dhaqaale wax ka baxsan masruuf waxaa inta badan loo bahan yahay inaad caddeyso inta ay qiimahoodu yihiin adigoo adeegsanaya rasiidh, soo jeedin qiime ama wax la mid ah. Habkaas ayaa la maraa masalan marka la doonayo daryeel caafimaad guud iyo mid ilkaha ah, daawo, muraayado indho, alaab aqal iyo rarid. Haddii aad shaqo la'aan tahay waa inaad muujisaa warqadda booqashada ee xafiiska shaqo-raadinta ama warqado kale oo caddeynaya inaad shaqodoon tahay. Haddii aad jirro ku qoran tahay waa inaad muujisaa caddeyn takhtareed.

Yaa heli kara kaalmo dhaqaale?

Maxaa loo baahan yahay si aan kaalmo dhaqaale u helo?

Kaalmo dhaqaale waxaa loogu talagalay inay shakhsiga u noqoto dhowrida ugu danbeysa uu kaga baxo dhibaatooyin dhaqaale kumeelgaar ah. Adiga ayey mas'uuliyada hore ku saaran tahay inaad xallisid marxaladdaada. Adeegga bulshada waxay masalan ku weydiin karaan inaad shaqo raadsatid oo aad oggolaato inaad ka qeyb qaadato barnaamijyada ama qorshayaasha ay degmada ama xafiiska shaqo-raadinta u dejiyaan dadka shaqo la'aanta ah.

Adeegga bulshada shaksi walba gaarkii ayey qiimeeyaan codsigiisa. Inta badan xaq uma lihid kaalmo dhaqaale hadday bangiga lacag kuu taalo ama aad leedahay hanti kale. Taasi micneheedu wuxuu yahay waa inaad tahay qof si buuxda u faro maran si aad xaq ugu yeelato kaalmo. Waa inaad sidoo kale marka hore raadsataa nacfiyo guud iyo lacagyow kale ee aad heli karto masalan gunno bukaan-socod, gunno waalid, kaalmo ijaar hooy iyo taageero masruuf ilmo.

Ma la heli karaa kaalmo degdeg ah?

Haa, haddii xaaladdu degdeg tahay. Ma qeexna waxa xaaladda degdegga ah ay noqon karto ee adeegga bulshada ayaa arrin waliba gooni u qiimeynaya.

Sharuudahee jira haddaan shaqo la'aan ahay?

Waa inaad ka diiwaan-gashan tahay xafiiska shaqo-raadinta oo aad si firfircoon shaqo u raadineyso. Waa inaad xitaa muujisaa inaad u joogto howlaha suuqa shaqada adigoo diyaar u ah inaad fuliso shaqooyinka ama barnaamijyada suuqa shaqada ee lagu fidiyo. Barnaamijyada suuqa shaqada waxay masalan yihiin waxbarasho suuq shaqo, tabobar, barnaamijyo dub-ugu-soo-celin shaqo iyo barasho iswiidhish ee loogu talo galay laajiyiinta (sfi). Xitaa barnaamijyada ay degmadu fidiso waa lagu tirin karaa halkan.

Marka ugu horeysa waxaa la doonayaa inaad raadiso oo aad qaadato shaqo waqti-buuxa oo habboon. Haddaadan durbadiiba heli karin shaqo waqti-buuxa waa inaad sii raadisaa oo aad sii qaadataa shaqo waqti-qaar-ah oo habboon. Waa inaad sidoo kale diyaar u noqotaa inaad raadiso shaqo ka baxsan qeyb-xirfadeedka iyo degmada aad horey uga shaqeyn jirtay.

Sharuudahee jira haddaan bukaan socod ahay?

Haddaadan jirro awgeed shaqeysan karin ama aadan shaqo u raadsan karin wuxuu adeegga bulshada shardi kaaga dhigayaa inaad jirro ku qoran tahay oo aad muujiso caddeyn takhtareed. Haddii jirro-ku-qornaantaadu ay dheeraato waxaa adeegga bulshada xitaa ku weydiin karaa qorshaha takhtarka ee dib-u-caafimaadintaada. Waxaa sidoo kale suurtoagal ah in adeegga bulshada uu doonayo inuu la xiriiro takhtarkaaga, Qasnadda caymiska iyo Xafiiska shaqo-raadinta si uu u ogaado caawimaadda aad u baahan tahay.

Sharuudahee jira haddaan arday ahay?

Adeegga bulshada inta badan uma oggolaado arday kaalmo dhaqaale teeramyada gudahooda. Waxaa markaa lagu arkaa qof is deeqsiin kara gunno waxbarasho ama taageero kale ee waxbarasho. Inta badan habka kale ee u bannaan qofka aan is deeqsiin karin gunnada waxbarashada waa inuu shaqeystaa. Hadday jiraan sababo gaar ah waxaa adeegga bulshada sameyn karaa wax reebban, masalan haddaad ku jirto marxalad aadan horey u filaneyn.

Gunnada waxbarashada waxaa lagu xisaabiyaa teeramka dhererkiisa, waxaana taas laga arkaa wargelinta gunnada waxbarashada muddada loogu talo galay inay lacagtu deeqdo. Muddooyinka waxbarashadu joogsato waxaa ku qabanaya sharuudaha quseeya dadka kale ee shaqo la'aanta heyso. Haddaad si firfircoon u raadsatay shaqo la qabto waqtiga kuleylaha oo aad weyday, xaq baad markaa u yeelan kartaa kaalmo dhaqaale haddaad buuxineysid sharuudaha kale (Fiiri iyadana su'aasha ku saabsan dhallinyaro shaqo la').

Sharuudahee jira haddaan ahay dhallinyaro shaqo la'?

Isla sharuudaha qabanaaya dadka kale ee shaqada la' (fiiri su'aasha ku saabsan dadka shaqada la'). Adeegga bulshada waxuu si gaar ah u weydiisan karaa dhallinyarada shaqada la' inay ka qeyb qaataan tabobar ama hawl kale ee awooddooda xirfadeed kor u qaadeysa. Taasi waxay quseysaa

- dhallinyaro ka yar 25 sano,
- shakhsiyaad ka weyn 25 sano ee baahi dheeraad ah u qaba hawl awooddooda xirfadeed kor u qaadeysa iyo
- arday muddada waxbarashadu joogsato u baahan kaalmo dhaqaale.

Hadduu arday codsado kaalmo dhaqaale muddada waxbarashadu ay ka xiran tahay waxaa adeegga bulshada ku weydiin karaa inaad ka qeyb qaadata tabobar hab uun ah, haddii xitaa kaas uusan ahayn mid looga baahan yahay xagg waxbarasho.

Adeegga bulshada wuu kuu diidi karaa kaalmo dhaqaale haddii aad maya ka tiraahdo tabobar ama hawl kale ee awooddaada xirfadeed kor u qaadeysa adigoo taas u heyn sabab la aqbali karo. Adeegga bulshada wuxuu markaas oo kale xitaa kaa yareyn karaa macaawimada.

Sharuudahee jira haddaan ahay dhallinyaro dugsiga sare isaga tagay?

Haddaad ka yar tahay 18 sano waalidkaa ayaa ku masruufaya. Haddaad buuxisay 18 sano waxaad codsan kartaa kaalmo dhaqaale adigoo adeegga bulshada tusaya inaad shaqo raadineysa. Waa laga yaabaa in adeegga bulshada ku weydiiyo inaad ka qeyb qaadata tabobar ama hawl kale ee awooddaada xirfadeed kor u qaadeysa (Fiiri su'aasha ku saabsan dhallinyaro shaqo la').

Adeegga bulshada sharuud kaagama dhigi karo inaad dib u billowdo dugsiga sare si aad u hesho kaalmo.

Sharuudahee jira haddaan ahay dhallinyaro doonaya inuu guriga waalidkii ka guuro?

Sharciyan waalidka mas'uulyad baa ka saaran masruufka ilmahooda illaa ay ka buuxiyaan 18 sano. Haddaad weli dugsi (dugsi sare) dhiganeyso markaad buuxiso 18 sano mas'uulyaddaas way sii dabodheeraanaysaa, waxeyna markaa sii soconeysaa illaa aad dugsiga ka baxdo, laakiin kama badaneyso muddada aad buuxiso 21 sano.

Micnaha 18-20 jirrada aan dugsi dhigan way codsan karaan kaalmo dhaqaale u gaar ah. Laakiin markay noqoto kaalmo qarash hooy u gaar ah, dhallinyaradu xaq cad uma laha. Dhallinyarada doneysa inay ka guurto guriga waalidkood waxay caawimo u helaan qarashka hooyga hadday guuriddu arrin culus sabab u tahay, masalan dhibaato caafimaad. Waxaa lagu xisaabtamaa inaysan dhallinyaro guriga waalidkood ka guureyn haddayan qudhoodu bixin karin qarashka hooyga.

Kaalmo dhaqaale maxaa loo heli karaa?

Kaalmo dhaqaale maxay tahay?

Kaalmo dhaqaale, ama wixii waagii hore cayrta loo yaqiin, waa taageero dhaqaale ee waafaqsan sharciga adeegga bulshada. Waxaa kaalmo dhaqaale loo heli karaa masruufka iyo wixii kale ee loo baahdo si heer nololeed macquul ah loogu noolaado.

Macaawimada loogu talagalay masruufka waxaa loo yaqaan taageero masruuf, waxayna ka kooban tahay caddad guud iyo qarash kale oo macquul (caqligal) ah ee buuxiya baahida caadiga ah, masalan hooy iyo koronto guri.

Qarashyada aan ku jirin taageerada masruufka waxay ku xiriiraan *nolosh* *inteeda kale*. Waana wax aan ku xiriirin masruufka balse kolley aan laga maarmin (Fiiri iyadana su'aasha ku saabsan caawimo kale).

Waa kuwee qeybaha taageerada masruufka ay ka kooban tahay?

Caddadka guud wuxuu ka kooban yahay qarash raashin, dhar iyo kabo, waqti firaqo iyo ciyaar, caafimaad iyo nadaafad, caymis ilmo iyo dhallinyaro, badeeco isticmaal ku dhammaata iyo misna jariidad, teleefan iyo ujro TV. Haddii ay jiraan sababo gaar ah, adeegga bulshada si gooni ah oo ka badnaan karta ama ka yaraan karta caddadka guud ayuu shakhsiga qarashkiisa ugu xisaabin karaa. Caddadka guud wuxuu ku saleysan yahay xisaabinta Hay'adda Macmiisha.

Taageerada masruufka waxa kaloo ku jira *qarash macquul ah* ee hooy, koronto guri, safarro shaqo, caymis guri iyo xubinnimo urur shaqaale iyo qasnad shaqola'aan. Waxa lagu tirin karo arrimahaas ka mid ah baahida jirta shakhsi waliba si gaar ah baa loogu qiimeeyaa, balse caadiyan waxaa lagu tiriyaa qarashka aad leedahay haddii uu yahay mid macquul ah. Qarash macquul ah waxaa loola jeedaa inuu yahay mid heerkiisu uu aqligal yahay.

Caddadka guud ee taageerada masruufka maxaa loogu talagalay inuu gooyo?

Raashin: Xisaabta waxay ku dhisan tahay liis cunto loogu talagalay afar toddobaad oo ka kooban cuntooyin nafaqo leh oo caadi ah ee quraac, qado, casho iyo casariye ah. Cunnada waxaa ka mid ah mid ka sameysan badeecad dabiici ah iyo mid warshadeed, aan ka ahayn macmacaan, halaqjafle ama khamro. Qarashka keli-u-noolaha wuu yaro sarreeyaa waayo waxay alaabta ku iibsadaan xirmo yar, khasirkooduna wuu badan yahay.

Dhar iyo kabo: Dhar iyo kabo caadi ah oo loogu talo gallay xilliyada, cimilada iyo marxaladaha sannadka oo dhan. Qarashka dib-u-habeynta kabaha, dharnadiifin qallalan iyo alaabo gaar loo qaato sida shandad, saacad iyo dallad way ku jiraan qarashkan.

Waqti firaqo iyo ciyaar: Waxyaalaha caadiga ah ee la qabto waqtiyada firaqada ah gude iyo dibedba oo ka kooban jimicsi iyo murti. Waxaa masalan ka mid ah xubinnimo urur/naadi isboorti, shaneemo aadis/ijaar filim, muusig dhegeysi, buug akhris, baaskiil kaxeyn, dabaal iyo baraf ku socod. Ilmaha yar tooda waxa masalan ka mid ah alaaba-alaabey iyo ciyaar. Waxyaalo u baahan qarash dheeraad ah ee la qabto waqtiyada firaqada, fasax, xaywaan guri iyo qarash ciyaaro koombuyuutar iyo kuwa TV kuma jiraan.

Caafimaad iyo nadaafad: Badeeco loogu talagalay nadaafadda jirka sida saabbuun, daawo caday, rummay iyo dufanka oogada la marsado. Qarashka ku baxa timojarka, mashiinka lagu xiirto iyo cudbiga la isaga dhigo xaylka wuu ku jiraa. Ilmaha da'doodu tahay ilaa 3 jir xafaayaddoodana way ku jirtaa. Badeeco daryeel caafimaad, booqasho takhtar iyo takhtar ilko iyo daawo kuma jiraan tirada (Fiiri iyadana su'aasha ku saabsan caawimo kale).

Caymis ilmo iyo dhallinyaro: Caymis horin ee cudur iyo shil.

Badeeco isticmaal ku dhammaata: Badeeco loo isticmaalo nadaafad guri, dhar iyo kabo, masalan waxyaalaha lagu dhaqo dharka, maacuunta iyo guriga, baakadaha boorka ee boornuugaha, nalalka iyo dufanka la mariyo kabaha. Warqadaha loo isticmaalo musqusha iyo jikada, warqadaha afka lagu tirtirto, bacyaha raashinka qaarkii lagu duubo iyo kuwa lagula rido qaboojiyaha, koollada iwm way ku jiraan.

Jariidad, teleefan iyo ruqso TV iwm: Dalab jariidad, ujro ruqso TV iyo qarash teleefan oo uu ku jiro qeyb ka mid ah qarashka moobiilka. Qarash warqado, boqshado, boosto-kaarro iyo boosto-istaambo way ku jiraan iyagana. Qarash taar-TV (cable TV), Internet iyo koombuyuutar kuma jiraan.

Habkee baa loo go'aamiyaa caddadka guud ee taageerada masruufka?

Caddadka guud waxaa sannad walba go'aamisa dowladda. Lacagyowga ku jira caddadka waxay ku saleysan yihiin xisaabin ay Hay'adda Macmiisha soo dejiso, waana inay noqdaan heer isticmaal caadi ah, oo ay micnaheedu tahay wax aan ugu yareyn uguna badneyn. Lacagyowga tiradooda waxay ku xiran tahay nooca qoyska iyo da'da.

Maamulka Bulshada waxay sannad walba warbixin ku saabsan lacagyowga caddadka guud ee taageerada masruufka ku soo qoraan Bogg farriin.

Ma heli karaa kaalmo dheeraad ah haddii qarashkeygu uu ka badan yahay kan ku xisaabsan caddadka guud ee taageerada masruufka?

Haa. Adeegga bulshada way kuu xisaabin karaan caddad intaa ka weyn. Kordhintaas oo kale wuxuu adeegga bulshada sameeyaa ka dib markuu qiimeeyo arrinta gaarka ah ee shakhsiga. Masaallo marxaladahaas oo kale ah ee caddadka lagu kordhin karo waxa u noqon kara haddaad u baahan tahay raashin qaali ah ama aad baahi dheeraad ah aad u leedahay teleefan ama barnaamijyada waqtiyada firaaqada. Waa inaad u caddeysaa adeegga bulshada in baahidaada ay keeneysa qarash ka badan kan ku tirsan caddadka.

Taas mid ku lid ah xitaa way jirtaa oo ah in adeegga bulshada arrin gaar ah u bixiyo caddad ka yar kan guud haddii ay jiraan sababo gaar ah.

Ma u heli karaa kaalmo dhaqaale qarashka hooyga xitaa haddaan ku noolahay daar ii gooni ah ama guri aan isticmaalkiisa xaqa u leeyahay?

Haa. Waxa muhiimaddu tahay in qarashku uu yahay heer caqligal ah. Maamulka Bulshada waxuu ku talinayaa in qarashka ku baxa daar shakhsi u gaar ah lagu tiriyo qarashka dulsaarka iyo qarashka lagamamaarmaanka u ah ku noolaashaha daarta, masalan qarashka biyaha, kululeynta daarta, qashinqaadka, caymiska iyo ujrada xaqa dhulka. Qarashka ku baxa hooy isticmaalkiisa xaqa loo leeyahay waxaa ku jira qarashka dulsaarka iyo ujrada bisha. Dib u bixinta deynta caawimo looma helo.

Waa intee qarashka caqligalka ah ee hooy laga bixin karo?

Ma jiraan sharuudo cad oo fudud ee sheegaya qarashka caqligalka ah ee hooyga wuxuu yahay. Xagga dowladda, adeegga bulshada baa laga doonayaa inuu arrin walba si gaar ah u qiimeeyo waxa caqligalka ah, una barbardhigo waxa danyarta ay goyn karto.

Maamulka Bulshada waxay ku talinayaa in adeegga bulshada uu qiimeyntiisaa sameysto isagoo tixgelinaya qarashka rasmiga ah ee ku baxaya hooyga iyo baahida gaarka ah ee loo leeyahay hooygaas isaga ah. Qarashka waa in loo barbardhigaa ijaarka shirkadaha dowladda ee guryaha ama shirkadaha kale ee waaweyn ee guryaha ijaara ee degmada aad deggan tahay ama degmada ugu dhow ee aadka u dhisan. Taladaasu waxay ku saleysan tahay fikradda ah in habkaas loo dego uu yahay kan danyarta caadiyan ay goyn karto.

Sharuudahee i qabanaya haddaan degganahay guri gacan labaad ah?

Mabda' ahaan sharuudo la mid ah baa ku quseeya sida kuwa guriga gacanta koowaad deggan. Waa inaad caddeyn kartaa inaad cinwaanka deggan tahay. Waa inaad ka diiwaan gashanaataa (ku qornaataa) halkaas oo aadna muujin kartaa qandaraas ijaar. Waa inay qandaraaska ku yaaliin warbixinnada adeegga bulshada ay uga baahan yihiin si ay u qiimeyn karaan in ijaarku uu macquul yahay. Waxaa masalan ka mid ah baaxadda iyo heerka wanaagga guriga, inuu saabaan leeyahay iyo in kale iyo waxa ijaarka ku tirsan. Habka aad uga heshiiseen masalan korontada guriga iyo teleefanka. Sida guriga gacanta koowaadba baa marxaladda guryaha xaafadda ama degmada saameyn kartaa waxa loo arko ijaar caqligal ah. Adeegga bulshada wuxuu qiimeyntiisa ku tix gelin karaa baahida aad hooy u leedahay iyo inay suurto gal kuu tahay inaad guri kale hesho.

Haddaad ka mid tahay kuwa ka heli karaa kaalmo ijaar hooy Qasnadda Caymiska, waxuu adeegga bulshada ku weydiin karaa inaad sameysato qandaraas ijaar xaq kuu siiya kaalmo ijaar hooy.

Ma u heli karaa kaalmo wax ka baxsan masruufka?

Haa. Ka dib marka arrinkaaga si gaar ah loo qiimeeyo waad u heli kartaa kaalmo dhaqaale wax kale. Talooyinka guud ee macaawimada dhaqaale waxuu Maamulka Bulshada ku soo qaadaa dhowr masaal oo ka mid ah baahida ka garab taagnaan karta masruufka. Waa qarash iyo ujo ay masalan ka mid yihiin:

- daryeel caafimaad,
- daryeel ilko,
- muraayado indho,
- qalab guri,
- guurid,
- qalab murjuc,
- safarro kulan,
- adeeg degmo,
- codsi iyo dullaal,
- cayaar caafimaad iyo
- duug.

Taxaani waa masaal uun, waana suurtoagal in kaalmo dhaqaale loo helo arrimo kale haddii la muujin karo in loo baahan yahay. Hadday jiraan sababo qaas ah waxaa mararka qaarkood kaalmo loo heli karaa dayn.

Markay noqoto daryeel caafimaad iyo daawo waxaa caadiyan kaalmo dhaqaale u heleysaa inta ku jirta difaaca qarash sare (kaarka raqiisinta). Qarashka daryeelka ilkaha waa inay marka hore intaysan daawadu billaaban laga soo ansaxiyaa adeegga bulshada, waxa reebban waa gargaar daryeel ilko degdeg ah. Haddii daaweynta ilkaha ay qaali tahay waxaa adeegga bulshada soojeedinta habka daaweynta u diri karaa takhtar kale inuu soo qiimeeyo.

Ma jiro xaq guud ee shakhsi helay guri isaga u gaar uu u leeyahay in la siiyo kaalmo saabaan iwm ee waa inay jirtaa sabab gaar ah. Taas masalan waxay noqon kartaa inaad ku qasban tahay inaad guurtid marxalad kula soo gudboonaatay oo degdeg ah oo qatar ah awgeed. Waxaad sidoo kale noqon kartaa qof dhalinyar oo ku qasban inuu ka guuro guriga waalidkii si uu u helo marxalad nololeed macquul ah. Safarro kulan waa safarro waalid ama ilmo ay degmo intay ka tagaan mid kale gaaraan si ay u kulmaan. Ciyaar caafimaad waxaa loola jeedaa masalan qarash safar ama ijaar guri lagu nasto.

Markay noqoto duugta waxa jira in marka hore loo isticmaalo hantida marxuunka in lagu bixiyo duugta. Qarashka duugta wuu ka horeeyaa bixinta qarashyada kale sida masalan ijaar, koronto, teleefan ama waxyaalo la mid ah. Haddii adeegga bulshada uu bixiyo kaalmo waa inay ku filnaataa duug sharaf leh. Adeegga bulshada waa inuu tixgeliyaa marxuunka dardaarankiisa iyo qaraabada rajadeeda ilaa xad aqligal ah.

Lacag ma la deysan karaa?

Maya, balse arrimo qaarkood waxaad u heli kartaa kaalmo aad dib-u-bixiso – fiiri su'aasha ku saabsan dib-u-bixinta.

Sidee loo xisaabiyaa kaalmo dhaqaale?

Sidee loo xisaabiyaa taageero masruuf?

Taageerada masruufka bil-bil baa caadiyan loo xisaabiyaa.

Marka hore waxaa la isla ogaadaa dadka uu *qoysku* ka kooban yahay. Adeegga bulshada waxay qoys u arkaan labo qof oo is qaba, wada deggan ama uu geyaankooda diiwaangashan yahay oo dhaqaale wadaaga. Markaa dabadeed waxaa caddadka guud loo xisaabiyaa qoyska. Waxaa la isku daraa *qarashka shakhsi* walba ee qoyska ka mid ah iyo *qarashka wadajir* qoyska ku baxa.

Iyadoo la isku daro caddadka guud iyo qarashka bil walba ku aadan hooyga, korontada guriga, safarrada shaqada, caymiska guriga iyo xubinnimada urur shaqaale iyo qasnad shaqo la'aan baa la ogaadaa inta qoysku guud ahaan u baahan yahay bil inuu kaga dabbaasho. Qarashyadaas waa inay noqdaan kuwo caqligal (macquul) ah. Qoyska baahidiisa taageero masruuf waxaa loo xisaabiyaa iyadoo laga gooyo daqliyada soo gala. Habka xisaabinta waxaa lagu sifayn karaa sidan:

Qarash shakhsi

+ qarash wadajir qoyska ku baxa

+ qarashyo macquul ah

- daqli

= baahi taageero masruuf.

Maxay dad ama qoysas kala duwan ay u helaan taageero masruuf kala badan?

Sida kaalmo kasta oo dhaqaale baa taageerada masruufkana qof waliba gaar loogu qiimeeyaa. Taas micnaheeda waxay tahay inta qof walba loo xisaabinayo ay ku xiran tahay baahidiisa. Waxa taas masaal cad u ah in qoys ilmo leh ay helaan taageero masruuf ka badan qof keligii nool madaama qarashka bil walbaa ka baxaa uu ka badan yahay. Laakiin taas misna micneheedu waxay tahay in laba qofood ee isku marxalad ku jira ay heli karaan kaalmo kala duwan maadaama adeegga bulshada uu u qiimeeyo in baahidooda ay kala badan tahay.

Sidee baa daqliga iyo hantida u saameeyaan inta kaalmo dhaqaale aan helaayo?

Marka adeegga bulshada uu xisaabinayo inuu qoys xaq u leeyahay kaalmo dhaqaale waxaa tirada lagu daraa dadka qoyska ka midka ah daqligooda netto (canshuur ka dib) oo dhan. Waxa masalan ka mid ah mushaar ama mushaar sagootin, gunno bukaan-socod, gunno waalid, gunno shaqo la'aan, hawlgab, taageero masruuf ilmo, gunno ilmo ama kaalmo ijaar hooy. Waxay xitaa caadiyan quseysaa masalan canshuur la soo ceshay, makdhaw iyo gunno laga helay shirkad caymis.

Hadday lacag bangiga kuu taal, aad leedahay saamiyo ama hanti kale oo si fudud u gadmeysa waxaa shardi ah inaad marka hore intaas isticmaasho. Haddaad leedahay hanti meel kaaga xiran, masalan daar ama guri isticmaalkiisa aad xaq u leedahay, in muddo ah ayaad heli kartaa kaalmo dhaqaale intaad ka iibineysid hantidaas ama dhibaataada dhaqaale aad hab kale ku xallisanaysid.

Ma heli karaa kaalmo dhaqaale haddaan leeyahay baabuur?

Inta badan baabuur waa hanti la iibin karo oo laga heli karo daqli, ha la isticmaalo ama yaan la isticmaaline. Adeegga bulshadase arrin walba gooni bay ugu qiimeysaa in baabuurka loo xisaabiyo hanti iyo in kale. Waxaa masalan la fiiriyaa qiimaha baabuurka iyo muddada aad u baahan tahay kaalmo dhaqaale. Haddii baahida macaawimada ay kumeelgaar tahay ama aad baabuurka ugu baahan tahay shaqadaada, adeegga bulshada way oggolaan karaan inaad iska haysato. Tani waxay sidoo kale quseysaa haddii baabuurku uu duug yahay oon daqli macno leh laga heleynin iibintiisa.

Maamulka Bulshada wuxuu ku talinayaa in baabuurka qarashkiisa (batrool, dayactir, iwm) lagu xisaabiyo baahidaada dhaqaale ee bisha haddaad masalan baabuurka uga baahan tahay dhaqadaada ama inaad shaqada ku tagto. Haddii kale qarashyadaas hab kale baad u dabberaneysaa.

Ma heli karaa kaalmo dhaqaale haddaan leeyahay guri lagu nasto?

Guri lagu nasto waa hanti la iibin karo oo daqli laga helo. Shardi waxaa ah in iibinta wax faa'iido ah laga helayo, micnaha in lacag soo hareyso markaad bixiso deynta guriga (haddey jirto). Inta badan adeegga bulshada wuu ogolaadaa inaad leedahay guri lagu nasto haddaad kaliya kaalmo dhaqaale u baahan tahay muddo gaaban, micnaha ugu badnaan afar bilood.

Ma heli karaa kaalmo dhaqaale haddaan leeyahay daar ama xaq isticmaal guri (aan shirko ku ahay)?

Daar ama xaq isticmaal guri mabda'a ahaan waa hanti la iibin karo oo sidaas awgeed saameyn ku yeelan kara xaqaaga kaalmo dhaqaale. Maamulka Bulshada wuxuu ku taliyey in daarta ama xaqa isticmaalka guriga loo xisaabiyo hanti haddii baahidaada kaalmo ay noqoto mid qotodheer oo qur ah, micnaha in ka dheer afar bilood. Shardi waxaa ah in iibinta wax faa'iido ah laga helayo, micnaha in lacag soo hareyso markaad bixiso deynta guriga (haddey jirto).

Adeegga bulshada waa inuu mar kastaa sameeyaa qiimeyn u gaar ah arrin walba. Way jiri karaan sababo aadan hooygaaga u iibin. Kuwaas waxay noqon karaan inay adkaato in hooy cusub la helo, in hooyga si loo iibiyo ay adag tahay ama guuridda ay hab kale adiga ama qoyskaaga ayan ugu habbooneyn. Haddaad kolleyba ku qasbanaato inaad iibiso daarta ama xaqa isticmaalka guriga wuxuu Maamulka Bulshada ku talinayaa inaad taas u hesho waqti aqli gal ah, kaasoo ugu yaraan ah afar bilood.

Ma ku khasbanaan karaa inaan dib u bixiyo lacagta?

Ma ku khasbanaan karaa inaan lacagta dib ugu celiyo adeegga bulshada?

Haa. Iyadoo la raacayo sharuudaha *sharciga adeegga bulshada* wuu awoodaa adeegga bulshada arrimo jira qaarkood inuu ku weydiiyo inaad dib u celiso lacagta horey loo bixiyey. Taasi waxay quseysaa

- haddii kaalmadu ay ahayd hormarin masalan bixin mushaar, gunno bukaan-socod, hawlgab ama kaalmo ijaar hooy,
- haddii qofka helay macaawimada uu khilaaf shaqo la soo gudboonaaday, masalan shaqo-ka-fariisad,
- haddii qofka macaawimada helay uu lacag leeyahay, balse uu si ku-meel-gaar ah u haleeli waayey taasoo ay ugu wacan tahay shaqo-ka-fariisad, dhibaato kombuyuutar ama wixii la halmaala ama
- haddii macaawimada ay qaldantay taasoo ay ugu wacneyd qalad dhacay ama warbixinno aan rasmi ahayn. Taasi waxay xitaa quseysaa haddii adeegga bulshada uu qaldamay oo uu lacag badan bixiyey. Sidaa darteed waxaa muhiim noqon karta in si fiican la isaga fiiriyo lacagta laga helo adeegga bulshada si aadan ugu khasbanaanin inaad dib u bixiso.

Adeegga bulshada wuxuu lacagta kaaga qaadi karaa go'aan qoran. Halkaasoo ay ku taal sababta lacagta lagu celinayo, adigana waa in lagu siiyaa koobiga go'aanka.

Sharuudaha sharciga adeegga bulshada waxaa garab yaal in adeegga bulshada uu xaq u leeyahay isagoo tiigsanaya sharciga caymiska guud inuu dib u helo lacag

- haddii macaawimada dhaqaale ay ahayd hormarin dib-u-bixin lacagyow bilbil loo qaato oo aad waa ka codsatay Qasnadda Caymiska. Kuwaasu waxay masalan noqon karaan hawlgab, lacag shaqogelin, lacag bukaan-socod, gunno bukaan-socod, kaalmo ijaar hooy ama taageero masruuf ilmo.

Mararkaas oo kale adeegga bulshada si toos ah ayuu dib-u-bixinta lacagta u weydiistaa Qasnadda Caymiska.

Maxaan sameyn karaa haddii adeegga bulshada uu i yiraahdo xaq uma lihid kaalmo dhaqaale?

Maxaan sameyn karaa haddii adeegga bulshada uu i yiraahdo xaq uma lihid kaalmo dhaqaale?

Mar walba xaq baad u leedahay inaad codsi soo gudbisid oo nidaamka la raaco. Adeegga bulshada waajib bay ku tahay haddii loo baahdo inay codsiga kaa caawimaan. Waxaad xitaa xaq u leedahay in go'aan qoran lagu siiyo si aad rafcaan uga qaadato.

Rafcaan ma ka qaadan karaa go'aanka adeegga bulshada?

Haa, rafcaan waad ka qaadan kartaa haddaad ku qanacsaneyn go'aanka. Taasi waxay sidoo kale quseysaa haddii codsigaaga qaar uun laga diiday. Waa inaadse rafcaan ku soo gudbisaa muddo saddex toddobaad ah gudahooda laga billaabo waqtiga aad go'aanka heshay.

Rafcaan micnihiisu waa in maxkamad ay goyneyso in go'aanka adeegga bulshada uu yahay mid sax ah. Maxkamadda way baddeli kartaa go'aanka, adeegga bulshada waa inay raacaan nidaamka maxkamadda. Haddaad ku qanacsanayn go'aanka maxkamadda maamulka gobolka waxaad arrinka u sii gudbin kartaa oo rafcaan geyn kartaa maxkamadda rafcaanka maamulka kama danbeyna Maxkamadda Dowladda. Mararkaas oo kale maxkamadda nafteed ayaa goyneysa inay rafcaanka gorfeyso iyo in kale (waxa lagu magacaabo ruqsada gorfeynta)

Adeegga bulshada waa inuu warbixin kaa siiyaa jidadka arrimahaan loo maro, waa inay xitaa haddaad u baahan tahay ku caawimaan.

Sidee rafcaan u qaataa?

Rafcaanku waa inuu qoraal ahaadaa. Ma jiro foom gaar ah ee loo baahan yahay oo rafcaanka si fudud baa loo qori karaa. Waxa muhiimka ah waa inaad sheegtaa go'aanka aad rafcaanka ka qaadaneyso iyo waxa kula qaldan. Haddaad rafcaanka caawimaad ugu baahan tahay adeegga bulshada bay waajib ku tahay inay ku siiyaan caawimaaddaas.

U dir rafcaanka xafiiska adeegga bulshada ee go'aamiyey arrintaada. Waa inuu meesha soo gaara kama danbeyn saddex toddobaad ka dib marka aad heshay go'aanka.